Dib u Eegista Qabyo Qoraalka Qorshaha Aagga North Highline Hagaha Akhristaha

Xubinta ka tirsan bulshada North Highline ee qaaliga ahaw:

Waad ku mahadsan tahay maadaama aad dib u eegis ku samaysay qabyo qoraalka dib u eegista dadwaynaha 2021 ee Qabyo qoraalka dib u eegista dadwaynaha ee Qorshah Xaafad Hoosaadka North Highline iyo Qorshaha Xaafad Hoosaadka North Highline - Wax ka bedelka Isticmaalka Dhulka iyo Khariidadaha Xaduudeynta iyo Shuruudaha Horumarineed. QorshahaXaafad Hoosaadka waxa uu muujinayaa aragtida bulshada ay ka qabaan mustaqbalka wuxuuna dejinayaa siyaasadaha lagu hagi doona go'aamada saamayn doona xaafadaada sanadaha soo socda.

Hagahan loogu talgalay akhristaha waa guudmarka qabyo qoraalka qorshaha xaafad hoosaadka iyo wax ka beddelka khariidadaha, waxaana ku xiga qaamuuska "ereyada muhiimka ah" ee laga helo qorshaha xaafad hoosaadka.

Muddada faallo-bixinta waxay soconaysaa **ilaa Axadda, Disembar 19.** Taariikhdaas kadib, Degmada King waxay isticmaali doontaa wixii ay ka maqashay dadweynaha si ay u cusboonaysiiso qorshaha iyo wax ka beddelka khariidadda. Guddiga Fulinta ee Degmada King ayaa qorshaha dib u eegista lagu sameeyey iyo wax ka bedelka la soo jeediyey u diri doona Golaha Degmada King horaanta sanadka 2022.

Waxaa jira dhowr siyaabood oo aad ku wadaagi karto fikradahaaga ku saabsan qorshaha:

1. **Bogga websaydhka:** www.publicinput.com/NorthHighline (wuxuu bixiyaa macluumaad wuxuuna aqbalaa faallooyin luqado badan ah)
2. **Iimayl:** SubareaPlanning@kingcounty.gov. Fadlan xaqiiji in cinwaanka iimaylka ay ku jirto "North Highline."
3. **Boostada Mareykanka:** Jacqueline Reid, Qeybta Aqbalaada ee King County, 35030 SE Douglas Street Suite 210, Snoqualmie WA 98065-9266
4. **Farriin codeed:** 206-263-3000

Waad ku mahadsan tahay ka qayb qaadashada geedi-socodkaan muhiimka ah.

To request this information in another format or language, call 206-477-3800 or email asklocalservices@kingcounty.gov.

Para solicitar esta información en Español, llamar al 206-477-3800 o envíe un mensaje de correo electrónico a asklocalservices@kingcounty.gov.

Si aad u weyddiisato inaad ku hesho macluumaadkan Af-Soomaali, fadlan wac 206-206-477-3800 ama iimayl u dir asklocalservices@kingcounty.gov.

Để có các thông tin này bằng tiếng Việt, xin gọi số 206-477-3800 hoặc gửi điện thư đến asklocalservices@kingcounty.gov.

ដើម្បីស្នើសុំព័ត៌មាននេះជាទម្រង់ឬភាសាផ្សេងទៀត សូមផ្ញើអ៊ីម៉ែលទៅ asklocalservices@kingcounty.gov ឬហៅទូរស័ព្ទលេខ 206-477-3800.

Hordhac

Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Dadweynaha ee Qorshaha Xaafad Hoosaadka North Highline wuxuu ku bilaabmayaa horudhac sharaxaya sababta degmada King County ay u qorshaynayso mustaqbalka North Highline, wuxuu qorshaha ku sharraxaa doorka dhexe ee sinnaanta iyo caddaaladda bulshada, wuxuuna qeexayaa in " hadafka kama dambayska ah ee Qorshaha Xaafad Hoosaadka North Highline uu yahay in la sameeyo horumar dhab ah, oo loo siman yahay oo lagu sameeynayo tayada nolosha qof kasta oo ku nool, ka shaqeeya, oo ku ciyaara North Highline. "

Hordhacu wuxuu qeexayaa taariikhda qorshaynta ee aaggan. Dabadeedna wuxuu guudmar ku sameeynayaa dadaalladii qorshaynta oo ay hore bulshadu u soo sameeyeen, oo ay ka mid yihiin Qorshihii Bulshada 1977 Highline iyo Xuduudeynta Aagga ee 1981, iyo Qorshaha Waxqabadka Bulshada ee Xarunta Cad ee 1994 iyo Xuduudeynta Aagga.

Waxa ku jira sharraxaad kooban ee hannaanka Liiska Baahiyaha Bulshada ee bilaabmay 2020 – oo ah hannaan la xiriira, laakiin ka duwan, Qorshaha Xaafad Hoosaadka.

Cutubyada Qorshaha Xaafad Hoosaadka (marka laga reebo Hordhaca, Hadafka iyo Mabaadi'da Hagaya, iyo Sharaxaada Bulshada), waxaa loo habeeyey sida soo socota:

- Asalka iyo macnaha guud
- Mudnaanta iyo baahiyaha bulshada
- Siyaasadaha

Qaybta hordhaca waxay ku dhammaanaysa sharraxaad ka bixinta macnaha sinnaanta iyo caddaaladda bulshada ee Degmada King County. Degmadu waxaa ka go'an inay noqoto mid:

- Loo dhan yahay oo wada shaqeyn la samaysa qof kasta
- Dad kala duwan leh isla markaana diiradda saaraysa dadka
- Jawaab celin iyo la qabsi leh
- Daah-furnaan iyo isla xisaabtan oggol
- Isir ahaan cadaalad leh
- Diirada saarta meesha ay baahiyadu ugu weyn ka jirto isla markaana "u janjeerta", halka ay ficilladu ka yihiin kuwa ugu waxtarka badan

Cutubka 1aad: Hadafyada iyo Mabaadi'da Hagaya

Hadafka iyo mabaadi'da hagaya bulshada waxaa la sameeyay iyadoo lagu salaynayo talooyinka ay soo jeediyeen bulshada kuwaas oo la helay intii aan diyaarinaynay Qorshaha Xaafad Hoosaadka. Hadafka bulshada waa oraah mustaqbalka diiradda saaraysa oo ku saabsan sida ay bulshada doonayso inay sii ahaato 20ka sano ee soo socda.

Oraahda Hadafka Bulshada

Iyagoo degan dhul dhaqameedkii dadka Duwamish, Dadka North Highline waxay u dabaaldegayaan kala duwanaanshahooda qowmiyadeed, xididdada jiilashooda kala duwan iyo ka mid noqoshadayada joogtada ah ee qoysaska iyo shakhsiyaadka kala duwan, gaar ahaan kuwa aadka u go'doonsan iyo kuwa aadka u nugul. Waxaan ku baaqaynaa sinnaan la'aanta ku salaysan jinsiyadda iyo goobaha deganaanshaha waxaana naga go'an in aan burburinno nidaamyada ku dhisan awoodda, mudnaanta, iyo caddaalad-darrada jinsiyadda. Annagoo is-ixtiraamayna oo is-taagereyna, waxaynu qiimaynaynaa oo aynu ku noolaanaynaa faahinnimadayada iyo awoodayada anagoo isticmaalayna hindisayaal ay bulshadu hogaan ka tahay, annagoo abuurayna horumaro fikir ku dheexan annagoon barakicinayn dadka mudada dheer soo degenaa iyo milkiilayaasha ganacsiyada yaryar, annagoo samaynayna isla markaana milkinayna siyaasadaha ina saameeya, iyo annagoo dhiseyna hantideena shaqsiyeed iyo mida guud, caafimaadkeena, iyo badqabkeena.

Cutubkan waxaa ku jira mabaadi'da hagada bulshada ee macluumaad ku biiriyey isla markaana hagay shaqada horumarinta Qabyo-qoraalka Dib-u-eegidda Dadweynaha ee Qorshaha Xaafad Hoosaadka, wuxuuna sharraxaad kooban ka bixinayaa wejiyada kala duwan ee ka-qaybgalka bulshada ee ay sameeyeen bulshada North Highline kuwaas oo loo isticmaalay horumarinta qorshaha qabyada ah.

Cutubka 2aad: Sharaxaada Bulshada

Cutubkani waxa uu sharaxayaa juquraafiga, dadka, iyo tirakoobka North Highline, iyo sidoo kale qaar ka mid ah hay’adaha dawladda iyo adeegyada gaarka ah ee degmooyinka ee ka jira halkaas. North Highline waa aag magaalo oo aan lala wadaagin degmada King, taas macnaheedu waa in aanay ka tirsanayn magaalo, waxaana maamul ahaan ay hoos timaadaa degmada King County.

North Highline waxaa ku nool bulsho kala duwan, oo leh dad Madow ah, Dadka Asaliga ah, ama dadka midabka leh oo ka kooban 61% ee dadweynaha halkaas ku nool (marka loo barbardhigo 40% oo guud ahaan ku nool King County). Luuqadaha ugu badan ee lagaga hadlo marka laga soo tago Ingiriis waa Isbaanish (18%) iyo Fiyatnaamiis (6%).

Cutubka wuxuu markaa qeexayaa siyaabaha kala duwan ee dhulka loogu isticmaalo xaafadda-tusaale: meel cidlo ah, degaan hal qoys ah; Qoysas badan; iyo goobaha ganacsiga.

Cutubka wuxuu iftiiminayaa dhawr hay'adood oo aan dawli ahayn oo bixiya adeegyada bulshada, kadibna wuxuu sharraxayaa hay'adaha dawladda ee bixiya adeegyada bulshada, sida Hay’adda Degmada ee Bulaacadda iyo Biyaha ee Southwest, Hay’adda Adeegyada Dadweynaha

ee Seattle, Hay'adda Dabka ee Degmada North Highline, iyo Maamulka Iskuulada ee Degmada Highline.

Cutubka wuxuu si kooban uga hadlayaa ku darsasho, oo ay la socdaan taariikhda ku saabsan codbixintii 2012 kaas oo North Highline ay u codaysay *inaanay* ka mid noqon Burien. Maanta, aagga waxaa loo aqoonsaday in lagu dari karo Seattle wakhtiga mustaqbalka ah.

Cutubka wuxuu ku dhammaanayaa dulmar ku saabsan sida North Highline ugu habboon tahay qorshayaasha gobolka ee koritaanka mustaqbalka ah.

Cutubka 3aad: Isticmaalka Dhulka

Cutubkani waxa uu sharxayaa sida qorshaha xaafad hoosaaska uu ula xiriiro Qorshaha Guud ee Degmada King, wuxuuna sharaxayaa sida qoondeynta isticmaalka dhulka ee Qorshaha Guud ay u muujinayaan isticmaalka wakhtiga dheer ee qorshaysan xaafad hoosaadka. Kala soocida aagagga ayaa sidoo kale nidaamiya sida guri gaar ah loo isticmaali karo iyo sidoo kale sharciyada horumarinta/dhismooyinka ee khuseeya guriga.

Iyagoo laga soo qaatay Qorshaha Guud ee Degmada King, sanadkii 2020 inta badan (58%) North Highline waxay leeyihiin qoondeynta isticmaalka dhulka oo ah "dhul dhexdhexaad ah oo magaalo la degi karo ah," kaas oo u oggolaanaya in u dhaxaysa 4 iyo 12 guryo oo degaan ah halkii ekar ah. Qoondeynta isticmaalka dhulka ee xiga ee ugu caansan (16%) waa "dhul sareeya oo noqon kara magaalo la degi karo," kaas oo u oggolaanaya in u dhaxaysa 18-48 guryo oo degaan ah halkii ekar ah. Taasi waxaa si dhow u soo raacaya qoondeynta isticmaalka dhulka ee ah "warshadaha", dhulkaas oo daboolaya 12% oo agga ah.

Ku dhawaad 7% ee dhulka North Highline waxaa loo qoondeeyay inay yahay "Xarunta Waxqabadka Aan La Wadaagnayn ee White Center." Aaggani wuxuu ku wareegsan yahay 16th Avenue SW, ("xuddunta" White Center), waxaana loogu talagalay in lagu taageero adeegyo kala duwan oo ay ku jiraan shaqada, guriyeynta, dukaamaysiga, adeegyada, iyo adeegyada wakhtiga firaaqada ah si loo daboolo baahiyaha dhaqaalaha deegaanka. Isticmaalka isku dhafka ah waxaa loogu talagalay in lagu soo daro guryo loogu talgalay qoysyo badan iyo dhismooyin isticmaalo isku dhafan.

Halkaan waxaa ku qoran mudnaanta isticmaalka dhulka oo ay xubnaha bulshadu noo sheegeen:

- Yareynta khataraha iyo saamaynta barakicinta la xiriirta deegaanka, dhaqaalaha, iyo dhaqanka
- In la ilaaliyo guryaha qiimahooda la awoodi karo, in la sameeyo guryo qiimahooda la awoodi karo, la iskana ilaaliyo barakaca deegaanka.

- In loo oggolaado qoysaska inay joogaan North Highline haddii ay sidaas rabaan, iyada oo meesha laga saarayo khatarta ah in qoysaska ay u barakaaca sababo la xiriira kharashka guryaha oo kordha. In jiilalka soo socda la siiyo fursad ay ku kiraystaan kuna iibsadaan guryo ku dhex yaala xaafada, iyaga oo awood u yeelan kara inay dhistaan hanti oo ay u suurtageliyeen helitaanka guryo iyo xulashooyin.
- Helitaanka guryo ku raagaya nolosha jiilaal kala duwan, oo laga heli karo gaadiid iyo adeegyada kale ee bulshada, oo isku xira xaafadaha adeegyada bulshada iyada oo aan loo baahnayn in lagu tiirsanaado baabuur.
- Qiimeynta muhiimada horumarka lala jaanqaadi karo, iyadoo laga warhaynayo saamaynta horumarka cusub uu ku yeelan karo xaafadaha la aasaasayo.
- Dhisida guryo qiimahooda la awoodi karo oo qurux badan.
- In si qoto dheer loo naqshadeeyo goobaha ganacsiga si loo daboolo baahiyaha ganacsiyada ay leeyihiin BIPOC iyo macaamiishooda, iyadoo la taageerayo mudnaanta bulshada si loo yareeyo khatarta barakaca dhaqanka.
- Taageerida fursadaha lahaanshaha ganacsi taageeraya waxyaabaha mudnaanta u leh bulshada si loo yareeyo khatarta barakaca dhaqaale iyadoo sidoo kale la taageerayo abuurista hanti.
- Taageerida awoodda lagu heli karo shaqooyin tayo leh, mushahar fiicana leh ee dhammaan warshadaha.
- Ilaalinta oo bixinta adeegyada North Highline kuwaas oo taageeri kara isu imaatinka bulshada, kobcin kara hantida kala duwan mida muuqata iyo mida dhaqameed ee bulshada, isla markaan gacan ka geysan kara caafimaadka iyo badqabka jiilalka hadda iyo kuwa mustaqbalka.

Cutubka isticmaalka dhulka ayaa qeexaya sida North Highline ay u kobci doonto 20-ka sano ee soo socda xagga guryaha iyo shaqooyinka. Cutubka wuxuu ku dhammaanayaa liis gareynta 12 siyaasadood oo la soo jeediyay kuwaas oo la isugu keenay cinwaannada Isticmaalka Dhulka, Adeegyada Deegaanka, Ganacsiga, Warshadaha, iyo Bulshada. Siyaasadaha, marka lagu daro siyaasadaha cutubyada kale, waxaa loogu talagalay in lagu yareeyo khatarta barakaca, lagu taageero kordhinta xulashooyinka kala duwan ee guryaha ee u dhow gaadiidka iyo xarumaha ganacsiga, in lagu taageero xarumaha ganacsiga ee jira iyo dhismooyinka la jaan qaadi kara meelaha deriska ah, iyo in lagu taageero in boosas banaan la siiyo adeegyada ay xubnaha bulshadu rabaan.

Cutubka 4aad: Adeegyada Guriyeynta iyo Aadanaha

Cutubka adeegyada guriyeynta iyo aadanaha wuxuu qeexayaa saamaynta qotada dheer ee guryuhu ku leeyihiin tayada iyo dhaqaalaha nolosha, iyo xaqiiqda ah in go'aamada qorshaynta ee fikirka ku dhisan ay awood u leeyihiin inay abuuraan xaafado fiican oo la dego kuwaas oo

taageera isku xirnaanta, kala duwannaanta bulshooyinka iyo xaafado ay isku dhaafaan jiilal badan.

Cutubku wuxuu markaa ka hadlayaa kor u kaca qiimaha guryaha ee xaafadda iyo culayska ay arrintaasi saarayo dadka hadda deggan. Dadka ku nool North Highline kuwaas oo ah BIPOC (Madaw, Dadka Asaliga ah, iyo Shakhsiyaadka Midabka leh) waxay ku dhow yihiin in si laban laab ah oo ba'an culays uga soo gaaro marka loo barbardhigo qoysaska cadaanka ah, taas oo muujinaysa khatarta sii kordheysa ee barakaca ah ee qoysaska midabka leh.

Halkaan waxaa ku qoran waxyaabaha mudnaanta leh ee xagga guriyeynta kuwaas oo xubnaha bulshadu noo sheegeen:

- Helitaanka guryo qiimahooda la awoodi karo.
- Ka hortagga barakaca aan ikhtiyaariga ahayn.
- Fursadaha ah in dadka hadda degan iyo jiilalka mustaqbalka ay kireysan karaan isla markaan iibsan karaan guryo ku yaala xaafadda ay ugu yeeraan gurigooda, iyo inay hanti ka samaystaan.
- Barnaamijyo badan oo bixiya fursadaha lahaanshaha guryaha, iyo sii haysashada iyo horumarinta guryaha kireysigooda la awoodi karo.
- Maalgelino dadweyne oo badan oo lagu sameeyo guryaha qiimahooda la awoodi karo, gaar ahaan iyada oo loo marayo taageerada mashaariicda ay hogaamiyaan ururada bulshada, kordhinta kaalmada xagga kirada ah, iyo helitaanka maalgelinta dayactirka guryaha ee loogu talagalay qoysaska dakhligoodu hooseeyo.
- Cufnaan kordhaysa taas oo lagu taageerayo korodhka adeegyada iyo xulashooyinka guryaha, iyadoo marin loo helayo gaadiidka iyo adeegyada bulshada, iyo baarkinka loogu talagalay xubnaha bulshada ee aan heli karin gaadiidka ama aan isticmaali karin noocyada gaadiidka ee firfircoon (sida socodka iyo baaskiil wadida).
- Isku dhafida guryaha ku yaala suuqa iyo guryaha maalgashiga dadwaynaha ee ku yaala hal xaafad iyo dhismooyinka cusub si loo taageero isticmaalida fursadaha.
- Kordhinta noocyada kala duwan ee xulashooyinka guriyeynta, oo ay ku jiraan guryaha ay isku dhaafi karaan jiilalka, guryaha qoysaska, iyo guryaha dhaqan ahaan ku haboon dadka waayeelka ah.
- In qiyamka dhulka ee kordhay looga faa’ideysto kaabayaasha cusub iyo maalgashiga gaadiidka si loo helo guryo qiimahooda la awoodi karo.
- In qiyamka hantida looga faa’ideysto in lagu khasbo ama lagu dhiirigeliyo shirkadaha dhismaha inay dhisaan guryo qiimahooda la awoodi karo marka la dhisayo guryaha qiimaha suuqa ah.

Cutubkani waxa uu liis gareeynaya afar siyaasadood oo la soo jeediyay oo la xiriira guryaha kuwaas oo taageera ilaalinta iyo kordhinta guryaha iyo wax ka qabashada barakaca. Noocyo kala duwan oo guryo ah, oo ay ku jiraan kuwa qiimahooda ay awoodi karaan xubnaha bulshada,

ayaa la dhisi karaa iyada oo la ilaalinayo guryaha hadda jira iyo abuurista dhismooyin guri oo cusub.

Taasina waxaa daba socda dood ku saabsan sida bixinta adeegyada aadanaha ay muhiim ugu tahay abuurista bulshooyin waara iyo taageeridda caddaaladda deegaanka. Kala duwanaanshaha dakhliga ee dadka jinsiyadaha iyo qowmiyadaha dkala duwan ee degan North Highline, iyo qoysaska North Highline, waxay u badan tahay saamayn doonto sinnaanta ah in dadka helaan ilo cunto oo caafimaad iyo xulashooyin leh.

Halkaan waxaa yaala waxyaabaha mudnaanta leh xagga caafimaadka iyo adeegyada aadanaha ah kuwaas oo xubnaha bulshadu noo sheegeen:

- Kordhinta helitaanka cuntooyinka caafimaadka leh, oo ay ku jiraan dukaamada raashinka ee Top Hat, jardiinooyinka bulshada iyo "p patches", beeraha khudaarta ee bulshada iyo bandhigyada wax karinta, cunnooyinka ku habboon dhaqanka, iyo suuqa beeralayda.
- Kordhinta adeegyada iyo barnaamijyada ay heli karaan dhalinyarada.
- Kordhinta barnaamijyada loogu talagalay dadka waaweyn ee kor u qaada caafimaadka iyo badqabka.
- Kordhinta barnaamijyada dugsiga kadib ah.
- Kordhinta xulashooyinka goobaha daryeelka caruurta iyo waxbarashada carruurnimada hore ee qiimahooda la awoodi karo.

Cutubka wuxuu liis gareynayaa laba siyaasadood oo la soo jeediyay oo la xiriira adeegyada aadanaha oo loogu talagalay in lagu taageero natiijooyinka caafimaadka wanaagsan iyo adeegyada taageerada.

Cutubka 5aad: Jardiinooyinka, Meelaha Bannaan, iyo Khayraad Dhaqameedka

Cutubkani waxa uu ku bilaabmayaa sharraxaadda sida jardiinooyinka iyo meelaha bannaan loogu maareeyo degmada King County iyo sharraxaadda nidaamka jardiinooyinka iyo meelaha bannaan ee degmada King County.

North Highline waxay leedahay lix dhismooyin oo ah jardiinooyin waaweyn iyo meelo banaan, oo ku fadhiya in ka badan 60 akaris, iyo qayb ka mid ah raad-goboleedka.

Cutubkani wuxuu sharxayaa adeegyada madadaalada iyo dhaqanka ee ka jira aagga.

Halkaan waxaa ku qoran jardiinooyinka iyo meelaha bannaan ee mudnaanta u leh bulshada kuwaas oo xubnaha bulshada ay noo sheegeen:

- Kordhinta jardiinooyinka iyo meelaha bannaan ee loogu talagalay madadaalada firfircoon iyo mida daahsoon.
- Wanaajinta marin u helka ama gelitaanka jardiinooyinka iyo meelaha bannaan.
- Bixinta agabyo badan oo badbaado leh.
- Kordhinta adeegyada sida jardiinooyinka eyda, jardiinooyinka bulshada/P-Patches, qalabyada garoonka ciyaarta, iyo goroomaha cayaaraha.
- Bixinta wadooyin iyo dariiqyo socod oo xariiqimo ku calaamadeysan.
- Ka ilaalinta isbeddelka cimilada iyo yareynta saameyntiisa.
- Kordhinta beerida geedaha si ay gacan uga geystaan yareynta saamaynta kulaylka magaalada.
- Kordhinta isticmaalka jardiinooyinka roobka iyo kaabayaasha kale ee cagaaran ee biyaha si loo helo meelo dheeraad oo cagaaran iyo kaydinta biyaha iyo in la ilaaliyo tayada biyaha.
- Kordhinta meelaha la isugu yimaado, lagu dabaaldego, oo lagu wadaago dhaqamada qaniga ah ee North Highline, sida fagaarayaasha, jardiinooyinka, iyo xarumaha bulshada.
- Bixinta fursado badan oo madadaalo, waxbarasho ah, iwm kuwaas oo dhaqan ahaan habboon.
- Noqoshada meel ay fanaaniintu ku hormaraan/kobcaan.

Cutubka wuxuu liis gareynayaa saddex siyaasadood oo la soo jeediyay oo loogu talagalay in lagu taageero fursadaha madadaalada iyo dhaqanka ee kordhay iyo in lagu hormariyo caafimaadka aadanaha iyo xaaladaha deegaanka.

Cutubka 6aad: Gaadiidka

Cutubkani waxa uu qeexayaa sida shabakadda gaadiidku ay saamayn weyn ugu leedahay tayada nolosha dadka iyo dhaqaalaha. Wuxuu bixinayaa macluumaad lagu heli karo shaqo, waxbarasho, adeegyo, madadaalo, iyo meelo kale. Cutubka wuxuu sharxayaa qaababka isticmaalka dhulka ee sida wanaagsan loo qorsheeyay iyo xaafadaha ay leeyihiin agabyo ay ka mid yihiin shabakadaha waddooyinka oo isku xiran, dukaanada ku hareereysan, waddooyinka socodka, iyo adeegga gaadiidka. Si la mid ah meelaha kale ee magaalooyinka aan la wadaagin ah, North Highline waxay u baahan tahay maalgalin dheeraad ah oo xagga nidaamka gaadiidka ah.

Cutubka waxa uu sharaxayaa adeegyada iyo tas-hiilaadka ay maamulaan Qaybta Adeegyada Wadooyinka Degmada King County, oo uu ku jiro sharaxaad gaaban oo ku saabsan mashaariicda aan la maalgalin ee lagu aqoonsaday Warbixinta Baahiyaha Gaadiidka ee degmada.

Halkaan waxaa ku qoran waxyaabaha mudnaanta leh ee xagga gaadiidka kuwaas oo xubnaha bulshadu noo sheegeen:

- Bixinta wadooyin la maro oo ku yaala dhinacyada iyo goobaha ganacsiga ee North Highline kuwaas oo lagu mari karo socod, baaskiil, gaadiid, iyo gaadiidka firfircoon si gacan looga geysto kobcitaanka aaggaa - oo ay ku jiraan aaggaga ganacsiyada yaryar, ee madax-bannaan.
- Wanaajinta marin u helka badbaadada leh ee dugsiyada, jardiinooyinka, iyo adeegyada kale ee bulshada ee dhammaan xubnaha bulshada.
- Aqoonsiga iyo qaabilaadda heerar kala duwan oo dhaqdhaqaaq ah.
- Wanaajinta isku xirka wadooyinka socodka iyo wadooyinka baaskiilka.
- Qurxinta muuqaalada waddooyinka.
- Wanaajinta iftiinka si loo dhiirageliyo socodka iyo baaskiilka.
- Wanaajinta wadooyinka North Highline ka soo galaya qaybaha kale ee gobolka, si loo taageero dhaqaalaha maxalliga ah.
- Wanaajinta aaditaanka xarumaha shaqada iyo xarumaha gaadiidka ee gobolka ee North Highline, si loo taageero marin u helka fursadaha iyo xulashooyinka shaqada.

Cutubka waxa uu liis gareynayaa saddex siyaasadood oo la soo jeediyay oo loogu talagalay in lagu taageero kobcinta gaadiidka dhow iyo jawi ammaan leh oo dhiirigelinaya socodka, isticmaalka gaadiidka, iyo baaskiilka.

Cutubka 7aad: Adeegyada iyo Tashiilaadka

Bulsho magaaleed kasta si ay u horumarto, waa in si ku filan loogu taageero adeegyo iyo taashiilaad kala duwan oo loogu talagalay magaalada. Adeegyadaas waxaa ka mid ah biyaha iyo bulaacada, maaraynta biyaha roobka, ururinta iyo asturidda qashinka adag, iyo ka hortagga dabka. Cutubkani waxa uu qeexayaa adeeg-bixiyeyaasha jooga North Highline waxaa uu sidoo kale xusayaa in ay wali jiraan aagag yar oo North Highline ka mid ah oo aan haysan adeegga bullaacadaha. Xubnaha bulshada waxay muujiyeen xiisaha ay u qabaan in meelahani lagu xiro nidaamka bullaacadaha.

Cutubka wuxuu liis gareynayaa saddex siyaasadood oo la soo jeediyay oo loogu talagalay in lagu wajaho baahida loo qabo adeegyada iyo taashiilaadka oo si fiican loo qorsheeyo.

Cutubka 8aad: Horumarinta Dhaqaalaha

Cutubkan waxa uu sharaxayaa bulshada ganacsiga iyo shaqada ka jirta North Highline wuxuuna xusayaa in kobaca shaqada ee aaggan uu kor u dhaafey kobaca shaqada ee guud ahaan degmada King County.

- Marka laga soo tago in mudnaan sare la geliyo joojinta barakaca deegaanka, dhaqanka, iyo dhaqaalaha, xubnaha bulshada waxay noo sheegeen arrimaha soo socda ee mudnaanta leh ee xagga horumarinta dhaqaalaha ah: Fursado loogu talagalay in dadka hadda deegaanka ah, ganacsiyada, iyo jiilalka mustaqbalka ku kobcaan oo ay hanti ka sameeyaan, iyada oo la ixtiraamayo lana qiimeeynaayo kala duwanaanshaha North Highline iyo gaarnimada bulshada halkan ku dhaqan.
- In dhalinyarada la siiyo fursado ay ku bartaan xirfado shaqo.
- Kordhinta helitaanka daryeelka caafimaadka carruurta ee qiimahiisa la awoodi karo si loo taageero qoysaska shaqeeya.
- Taageerida qoysaska doonaya fursado shaqo haddii Ingiriisigu aanu ahayn luuqaddooda koowaad.
- Taageerida ganacsiyada bixin kara shaqooyinka leh mushaharka ku haboon qoysaska ee bulshada.
- Ka caawinta bulshada inay maalgelin u raadsadaan, iyo maalgashi, kaabayaasha iyo adeegyada u adeega badqabka guud ahaan North Highline.
- Taageerida qoysaska halista ugu jira barakaca, kuwaas oo dakhligoodu aanu gaareyn inu maalgashi ku sameeyaan guryahooda.
- In ganacsiyada yaryar la siiyo marin u helka adeegyada khasbashada xirfadaha shaqo ee qiimahooda la awoodi karo adeegyadaas oo ah waxbarasho, tababar shaqo, macallin u noqosho, iyo la-talin.

Cutubka wuxuu liis gareynayaa laba siyaasadood oo la soo jeediyay oo loogu talagalay in lagu taageero dhaqaalaha iyo baahiyaha kale ee horumarinta bulshada.

Lifaaqyada

Qabyo-qoraalka Dib-u-eegista Qorshaha Bulshada ee Xaafad Hoosaadka North Highline wuxuu leeyahay afar lifaaqyo. Lifaaqa A waa khariirado iyo jaantusyo la soo aruuriyey kuwaas oo loo isticmaalay in lagu sameeyo qorshaha xaafad hoosaadka. Lifaaqa B waxa uu soo jeedinayaa qorshe lagula soconayo fulinta iyo waxqabadka qorshaha xaafad hoosaadka. Waxaana ku jira shan hab-beeg oo hawl-qabad ku salaysan kuwaas oo lala socon/la kormeeri karo muddo kadib, iyo shan cabiro oo faahfaahsan isla markaana tayaysan oo loogu talalgalay fulinta qorshaha North Highline, kuwaas oo ka warramaya sheekada ah sida bulshadu ay u fulinayso hadafkeeda. Lifaaqa C waa dib-u-eegista saameynta waxaana loogu talagalay in lagu dulmaro sida qorshaha xaafad hoosaadka loo sameeyay iyo sida ay u saameyn karto dadka deggan North Highline. Lifaaqa D waa dulmarka ka qaybgalka bulshada ee ay samaysay degmada King County intii aanu samaynaynay qorshaha xaafad hoosaadka.

Isticmaalka Dhulka iyo Waxka bedelka Khariidadda Xuduudeynta

Marka Qorshaha Xaafad Hoosaadka North Highline loo diro Golaha Degmada King County, waxa la socon doona qaybo lagu taliyay oo ah Isticmaalka Dhulka iyo Wax ka beddelka Khariidadda Xuduudeynta, oo ay ku jiraan wax ka beddello lagu taliyay oo ku aadan shuruudaha horumarinta ee ku jira Xeerka Degmada King County iyadoo la adeegsanayo "Duqashooyinka Gaarka ah ee Degmada". Kuwani waa:

Waxka bedelka Khariidadda ee 1aad: White Center, Roxhill, Top Hat, iyo Glendale – Dib-u-qeexida xuduudaha iyo Shuruudda Add P-Suffix.

Wax ka beddelkaani wuxuu ogolaanayaa in cufnaan sareeysa laga dhex arko degaannada cufnaantoodu dhexdhexaad tahay ee North Highline kuwaas oo u dhow aagagga ganacsiga, marinnada gaadiidka, ama meelaha cufnaanta badan oo isticmaalo dhul ku badan yahay ee la degan yahay. Korodhkan cufnaanta ah ayaa bixinaysa fursado dhismo deegaan ah oo dheeraad ah. Shuruuda dhismooyinka P-Suffix (parcel-specific) ee cusub waxay xaqiijinaysaa in dhismooyinka cusub ee cufnaantan sare leh ay la mid yihiin tan hadda loo oggol yahay xirmada. Tani waa in lagu taageero dhismooyinka la jaan qaadi kara meelaha la dego ee cufnaanta hoose leh.

Waxka bedelka Khariidadda ee 2aad: White Center, Roxhill, Top Hat, and Glendale – Dib U Qeexida Isticmaalka Dhulka Deegaanka ee Cufnaanta Sare Leh iyo Dib-u-qeexida Xuduudaha.

Wax ka beddelkaani wuxuu u oggolaanayaa meelaha deganaanshaha cufnaanta sare leh ee aagagga ee hadda loo qoondeeyay dhismooyinka degaano cufnaantoodu dhexdhexaad tahay, oo ku dheggan aagagga ganacsiga, marinnada tareennada, ama meelaha dhismooyinka degaanka ee cufnaantoodu sareeyso ay hadda ka jiraan.

Waxka bedelka Khariidadda ee 3aad: Xarunta Hawlaha Magaalada ee White Center - Ka saar Shuruudaha P-Suffix

Wax-ka-bedelkaan waxa uu meesha ka saarayaa shuruud dhismo oo P-Suffix (parcel specific) ah oo horey u jirtay taasoo faraysa Degmada King County inay go'aamiso baahida loo qabo isgoysyada dhismada la saameeyey. Shuruudu hadda lagama maarmaan ma aha sababtoo ah heerarka hadda jira ee Degmada King County, oo ay ku jiraan Xeerarka Dhismaha iyo Naqshadeynta Wadooyinka King County, waxay qiimeeyaan baahida loo qabo isgoysyada marka a dhisayo guryaha.

Wax ka beddelka Khariidadda North Highline ee 4aad: Glendale – Ka saar Shuruuda P-Suffix

Wax-ka-bedelkaan waxa uu meesha ka saarayaa shuruud dhismo oo P-Suffix (parcel specific) ah oo horey u jirtay. Waxaa uu u baahan yahay in dhismooyinka la isugu keeno hal xidhmo si loo

ilaaliyo meelaha aan la horumarin ee ku yaala xirmo kale. P-Suffix waxaa lagu dhejiyay guryaha iyadoo lagu salaynayo soo jeedin horumarineed oo aan weli miro dhalin. Shuruuda dhismaha hadda lagama maarmaan ma aha sababtoo ah dhismo kasta oo mustaqbalka ah la sameeynaayo ayaa dib u eegis lagu samayn doonaa iyadoo la isticmaalayo Xeerka Degmada King County.

Wax ka beddelka Khariidadda North Highline ee 5aad: White Center iyo Glendale – Dib-u-qoondeynta Isticmaalka Dhulka ee Meelaha Bannaan

Wax ka beddelka khariidadani waxay bedelaysaa qoondada isticmaalka dhulka ee aagga White Center iyo Glendale si loo muujiyo in xirmooyinkan/aagaggan ay qayb ka yihiin Nidaamka Meelaha Furan ee Degmada King County.

Wax ka beddelka Khariidadda North Highline ee 6aad: Xarunta Hawlaha Magaalada ee White Center - Ka saar Heerka Gaarka ee Degmada ee Ku Aadan Dib-u-kobcinta Dhaqaalaha

Wax-ka-beddelkan waxa uu Xeerka Gaarka Ah ee Degmada ee Ku Aadan Dib-u-kobcinta Dhaqaale ka saarayaa aaggaga ku yaa xudunta White Center. Ujeedada Xeerka Gaarka ah ee Degmada waa in la bixiyo dhiirigelin dib-u-kobcin loogu samaynayo dhulalka ganacsi iyo kuwo warshadeed ee waaweyn oo hadda ka jira magaalooyinka dhexdooda. Xeerka Gaarka ah ee Degmada looma dhaqan gelinin dhiirigelinta dib-u-kobcinta aagga ay dhibaatadu saameysey tan iyo markii lagu ansixiyay Qorshaha Waxqabadka Bulshada ee White Center 1994.

Waxka bedelka Khariidadda ee 7aad: White Center iyo Top Hat - Ka saar Xeerka Gaarka ah ee Ganacsiga/Warshadaha Degmada

Wax-ka-beddelkan waxa uu Xeerka Gaarka ah ee Ganacsiga/warshadaha Degmada ka saarayaa aagagga ku yaala xudunta Degmada Ganacsiga Bulshada White Center iyo the Top Hat. Xeerka Gaarka ah ee Degmada waxaa lagu hayaa dhowr aaggag oo ku yaala Xaafad Hoosaadka North Highline. Ujeedada Xeerka Gaarka ah ee Degmada waa in la qaabilo oo la taageero goobaha ganacsiga iyo warshadaha ee ka baxsan xarumaha hawlaha iyada oo la bixinayo dhiirigelinta dib u dhiska dhulka aan laga faa'iidaysan. Wax-ka-beddelka khariidadda waxa ay Xeerka Gaarka ah ee Degmadda ka saaraysaa aaggaga hadda lagu sameeyay guryaha/dhismooyinka isticmaalkooda-isku-dhafka ah iyo/ama aan ku habboonayn isticmaalka ballaaran ee ganacsiga iyo warshadaha ee uu oggol yahay xeerku. Meeshii Xeerka Gaarka ah ee Degmada uu weli ka sii jiro, waxaa lagu sameeynaayaa dib eegis si wax looga beddelo si loo tixgeliyo isticmaalka iyo shuruudaha ay tahay in la taageero.

Waxka bedelka Khariidadda ee 8aad: Xarunta Waxqabadka Aan La Wadaagnayn ee White Center – Ku dar Xeerka Gaarka ah ee Degmada ee Wadada 16th Avenue SW

Wax ka beddelkani wuxuu Xeer Degmo oo Gaar ah u abuurayaa aagagga ku yaala wadada 16th Avenue SW ee xudunta u ah White Center inta u dhaxaysa SW Roxbury Street iyo SW 100th Street. Xeerka Degmada ee Gaarka ah waxaa loogu talagalay in lagu taageero sii haynta doorka

marinka ganacsi ee White Center. Wuxuu u baahan yahay in dhismooyinka cusub ay moqdaan kuwo diiradda lagu saarayo dadka lugeynaya loona cabbiro si waafaqsan. Degmada King Country waxay danaynaysaa inay ogaato in heerarka dhismooyinka dheeraadka ah ay taageerayaan sii haynta doorka marinka ganacsiga iyo inay wanaajinayaan waxyaabaha ay dadka lugaynaya kala kulmayaan marinka.

Waxka bedelka Khariidadda ee 9aad: Xarunta Waxqabadka Aan La Wadaagnayn ee White Center - Kudar Xeerka Degmada ee Gaarka ah ee Diiradda Lagu Saarayo Dadka Lugaynaya ee Xarunta Waxqabadka Aan La Wadaagnayn ee White Center

Wax-ka-beddelkan waxa uu Xeerka Degmada ee Gaarka ah ee Diiradda Lagu Saarayo Dadka Lugaynaya ee Xarunta Waxqabadka Aan La Wadaagnayn ee White Center u abuurayaa aagagga ku yaala xudunta White Center ee bariga waddada 16th Avenue SW. Wuxuu ku soo kordhinayaa heerarka dhismooyinka ee diiradda lagu saarayo dadka lugaynaya si loo dhiirigaliyo ku socodka xaafada waxaana lagu raadinayaa inay isku xirto bartamaha magaalada ee White Center iyo adeegyada bulshada ee Steve Cox Memorial Park, Maktabada White Center, iyo Dugsiga Hoose ee White Center Heights. Xeerka Degmada ee Gaarka ah waxa uu ka faa'iidaysanayaa waddooyinka taraafikada ee dhex mara Xarunta Waxqabadka Aan La wadaagin ee White Center.

Waxka bedelka Khariidadda ee 10aad: **Xarunta Waxqabadka Aan La Wadaagnayn ee White Center – Dib-u-qeexida Xuduudaha Kudarida Xeerka Degmada ee Gaarka ah ee Isticmaalka Isku Dhafan ee Xarunta Waxqabadka Aan La Wadaagnayn ee White Center**

Wax ka beddelkaani wuxuu bedelayaa xuduudaha warshadaha ee aagagga xudunta u ah White Center kuwaas aan habboonayn cabbir ahaan, goob ahaan ama isticmaalkooda hadda ah si loogu sameeyo dhismooyinka warshadaha. Xeerka Gaarka ah ee cusub ee Degmada wuxuu u baahan yahay in dhammaan dhismooyinka cusubi noqdaan kuwo leh isticmaal isku dhafan (kuwo isugu jira qaybo ganacsi ah iyo qeybo guryo ah) oo waa inay buuxiyaan qaar ka mid ah heerarka diiradda saaraya dadka lugaynaya. Xeerka Degmada ee Gaar ah ee Isticmaalka Isku-dhafan ee Dhismooyinka sidoo kale waxaa ku jira shuruudaha dhismooyinka ee ah in diiradda lagu saaro dadka lugeynaya iyo shuruudaha ah in la dhimo baarkinka ka baxsan laamiga.

Waxka bedelka Khariidadda ee 11aad: Glendale - Dib-u-qoondeynta Isticmaalka Dhulka Ganacsiga ee Bulshada Beesha iyo Dib-u-qeexida Xuduudaha

Waxka beddelkaani waxa uu bedelayaa qoondeynta isticmaalka dhulka iyo xuduudeynta meelo badan oo ku yaala Glendale si loo waafajiyo dhismooyinka hadda ka jira aagagga.

Waxka bedelka Khariidadda ee 12aad: White Center, Roxhill, Top Hat, iyo Glendale – Kudar Shuruuda P-Suffix

Wax ka beddelkan ayaa xaddidaya wadarta guud ee ganacsiyada tafaariiqda ee ka ganacsada xashiishka ee loo ogol yahay gudaha xaafad hoosaadka North Highline si looga dhigo ilaa labo. Tafaariiqlayaasha xashiishka ee hadda jira, kuwaas oo si sharci ah loo sameeyey ayaa loo ogol yahay inay sii shaqeeyaan waxaana loo maamuli doonaa sidii isticmaal aan waafaqsanayn oo kale. Tirada tafaariiqlayda xashiishka ee ku yaala gudaha xaafad hoosaadka North Highline looma ogolaan doono inay ka bataan inta hadda jira.

Wax ka beddelka khariidadda ee 13aad: Dib-u-qeexidda Aagga Ganacsiga iyo Warshadaynta ee White Center

Wax ka beddelkaani wuxuu bedelayaa soohdinta labada qaybood ee dhulka xudunta u ah White Center wuxuuna ka bedelayaa Warshado una bedelayaa Goobo Ganacs maadaama aanay haboonayn cabbir ahaan, goob ahaan, ama isticmaal ahaanba.

Shuruudda Dhismooyinka Soo saarista iyo ka Shaqaynta Xashiishka

Ka sakow 13-ka wax ka bedel ee khariidadaha ah, waxaa la soo jeedinayaa in wax ka beddel lagu sameeyo Xeerka Degmada ee Gaarka u ah Dib-u-kobcinta Dhaqaale ee hadda ka jira White Center. Wax ka beddelku waxa uu ka jawaab ceilnayaa talo soo jeedinta ku jirta Warbixinta Xashiishka ee Degmada King County si soo saarista iyo ka shaqeynta xashiishka looga xashiishka aagga.

Sharaxaada luqadda fudud ah ee ereyada lagu isticmaalo qorshayaasha xaafad hoosaadka iyo wax ka beddelka khariidada

Ereyada Guud
Guryo qiimahooda la awoodi karo macneheedu waa guryo kharashkoodu ka badan 30% ee dakhliga billaha ah ee qoyska.
Ku-darista macneheedu waa geedi-socodka ee aag Degmo ee aan la wadaagin lagugu darayo soohdinta magaalo kale.
Dakhliga Dhexdhexaadka ah ee Aagga waxaa loola jeedaa dakhliga qoyska ee dhexdhexaadka ee qoysaska gobolka. Kani waa cabbir federaalka uu u isticmaalo in lagu go'aamiyo helitaanka adeegyada.
BIPOC waxaa loola jeedaa madow, dadka asaliga ah, iyo dadka kale ee midabka leh.
Liiska Baahiyaha Bulshada waxaa loola jeedaa liiska bulshada ay samaysay ee ka kooban adeegyada, barnaamijyada iyo mashaariicda horumarinta raasamaalka ee taageera hadafka bulshada ee deegaankooda.
Qorshaha Aagga Adeegga Bulshada (CSA) waxaa loola jeedaa qorshe 20 sano ah kaas oo ka hadlaya mawduucyo badan oo la xiriira maareynta kobaca ee aag juqraafi ah. Qorshayaasha Xaafad Hoosaadka waxa ka mid ah oraahda hadafka bulshada iyo siyaasadaha xaafadaha gaarka u ah ee hagaya go'aamada 20-ka sano ee soo socda. Qorshayaashani waa qayb ka yihiin, oo ay diiradda saaraan, Qorshaha Guud ee Degmada. Waxa jira aag juqraafiyeed oo loogu talagalay qorshaynta CSA oo lix miyi ah, shana magaalo ah.
Oraahda Hadafka Bulshada waxay qayb ka yihiin qorshaha xaafad hoosaadka waxayna qeexaysaa xaaladda mustaqbalka ee bulshada kadib marka la dhaqan geliyo mabaadiida hagaya, siyaasadaha, iyo isticmaalka iyo xuduudeynta dhulka ee qorshaha xaafad hoosaadka.
Qorshaha Guud (Comrehensive Plan) waxaa loola jeedaa qorshaha fog ee degmada ee loogu talagalay maareynta kobaca dadweynaha mustaqbalka. Waxay ka hadlaysaa isticmaalka dhulka, guriyeynta, gaadiidka, adeegyada guryaha, tas-hiilaadka raasumaalka ah, iyo walxaha kale, ee waafaqsan sharciga gobolka. Qorshayaasha Xaafad Hoosaadka CSA waxay qayb ka yihiin Qorshaha Guud.
Barnaamijyada Dhiirrigelinta Cufnaanta waxaa loola jeedaa barnaamijyada u oggolaanaya mashaariicda dhismaha inay helaan guryo badan ama boosas shaqo oo badan iyagoo bedelkooda dhiibaya nooc ka mid ah gunnooyinka dadweynaha, sida guryo qiimahooda la awoodi karo ama ilaalinta meelaha bannaan.

Ereyada Guud
Cufnaan waxaa loola jeedaa tirada dhismayaasha ee ku yaal aag juqraafi. Cufnaan waxaa inta badan loo isticmaalaa inay tahay tirada guryaha ku yaala cabir dhul ah.
Waxyaabaha Go'aamiya Sinnaanta waxaa loola jeedaa xaaladaha jireed iyo bulsho ee aagga ka jira kuwaas oo ay dadku ku dhasheen, ku nool yihiin, kuna shaqeeyaan. Waxaana ka mid ah helitaanka adeegyada horumarinta carruurta, shaqo iyo tababar shaqo, cunto caafimaad leh, jardiinooyin iyo meelo bannaan, badbaadada dadweynaha, iyo in kale oo badan.
Xeerarka Dhismayaasha waxaa loola jeedaa sharciyada deegaanka lagu ansixiyay ee loogu talagalay xuduudeynta, heerarka dhismayaasha iyo wax dhisida, ilaalinta deegaanka, xaafad-hoosaadyada, iyo in kale oo badan. Xeerarka dhismayaasha waa inay la jaanqaadaan siyaasadaha ku jira Qorshaha Guud iyo qorshayaasha xaafaad hoosaadka.
Barakac waxaa loola jeedaa in dadka deegaanka ah ama meheradaha hadda jira si aan ikhtiyaari ahayn looga guuriyo gurigooda ama goobtooda ganacsiga. Barakaca waxa uu ku imaan karaa koror xagga kharashaadka ama ijaarka ah, ka saarista guryaha, iibka guryaha, ama sababo kale.
Guri La Dego waxaa loola jeedaa guri leh hal qol ama in ka badan oo qofku ku noolaan karo, waxaana badanaa ku yaala jiko iyo musqulo gaar ah ama la wadaago.
Horumar loo siman yahay waa marka tayada natiijooyinka nolosha ay si siman u helaan dadka isla markaa ku nool kana shaqeeya xaafadda, iyo sidoo kale dadka cusub ee soo degaya xaafada. Ariimahaan waxaa inta badan ka mid ah diiradda saarista mashaariicda guud iyo kuwa gaarka ah, adeegyada, iyo barnaamijyada ka shaqeeya baahiyaha dadka aan si ku filan loogu adeegin.
Barakicin Dhaqaale waa marka ay dad dakhligoodu sarreeyo oo dib u hagaajinaya ama dhisanaya guryo cusub iyo ganacsiyo cusub ay ku soo qulqulaan xaafad taariikhi ahaan iska tabar yarayd iyo/ama maal-gashi badan aanan ka jirin, taasina waxay sababi kartaa barakac.
Xeerka Maareynta Kobaca waxaa loola jeedaa sharciga gobolka lagu hoos abuuro qorshayaasha xaafadaha hoose iyo qorshayaasha guud, iyo fulinta shuruucda horumarinta, si loo qorsheeyo koritaanka dadweynaha ee mustaqbalka.
Mabaadi'da Hagaya waa oraahyo/bayaano diiradda saaraya yoolka kuwaas oo gacan ka geysanaya qeexida Bayaanka Hadafka Bulshada ee qorshaha xaafad hoosaadka. Caadi ahaan waa kuwo mustaqbalka diiradda saara waxayna qeexaan sida siyaasadaha qorshaha xaafad hoosaadka ay tahay in loo fahmo loona hirgeliyo.

Ereyada Guud
Xuduudeynta Loo Wada Dhan Yahay waxaa loola jeedaa xeelado kala duwan oo gacan ka geysta dhisidda guryo qiimahooda la awoodi karo oo qayb ka ah mashaariicda dhisida guryaha sicirka suuqa jooga. Waxaana badanaa ku jira dhiirigelin, sida gunnooyinka cufnaanta, oo lagu bedelanayo dhisidda guryo qiimahooda la awoodi karo.
Xaafadaha Ku Yaala Xaduudaha waxaa loola jeedaa dhul ku yaala soohdinta magaalada.
Guryaha Xaafadaha Cufnaanta Dhexdhexaadka ah leh waxaa loola jeedaa guryaha laba dabaqlaha ah, guryaha magaalada, iyo dhismayaasha abaartimentiyada yaryar kuwaas oo ah laba dabaq camal ah. Waxaanan ku jirin guryaha halka qoys dega iyo dhismayaasha abaartimentiyada waaweyn leh.
Dhismooyinka Isticmaalkooda Isku-dhafka ah waxaa loola jeedaa dhismayaasha ka kooban goobo ganacsi iyo guryo la dego labadaba. Tusaalo caadi ah wuxuu noqon karaa dhismo leh bakhaaro tafaariiqeed oo ku yaala dabaqa hoose iyo abaartimentiyo la dego oo ku yaala dabaqyada sare.
Aag Suurtagal Tahay in Kudarsasho Lagu Sameeyo waxaa loola jeedaa dhul magaalo oo aan la wadaagin oo xiriir la leh magaalo mustaqbalka lagu dari karo.
Dhismo Diiradda Lagu Saarayo Gaadiidka waxaa loola jeedaa dhisidda guryo cusub oo ku yaalla agagaarka adeegyada gaadiidka dadweynaha.
Aagagga aan Ka Wadaagin waxaa loola jeedaa dhul ku jira maamulka degmada lakin aan ku dhex oolin xuduudka magaalada.
Aagga Kobaca Magaalada waxaa loola jeedaa goobta lagu qeexay Qorshayaasha Guud halkaas oo inta ugu badan ee guryaha mustaqbalka lagu dhisi doono laguna abuuri doono shaqooyin. Tani waxay ilaalinaysaa meelaha bannaan iyo dhulalka beeraha iyo kaynta ah.
Adeegyada iyo Taashiilaadka Magaalada waxaa ka mid ah nidaamyada bullaacadaha iyo biyaha, adeegyada bixinta biyaha, tamarta, isgaarsiinta, adeegyada badbaadada dadweynaha iyo xaaladaha degdegga ah, dugsiyada, maktabadaha, iyo in kale oo badan.

Ereyada la xiriira Isticmaalka Dhulka iyo Xuduudeynta

Xarun waxaa loola jeedaa aag lagu aqoonsaday qorshe maxalli ah ama qorshe gobol halkaas oo diiradda lagu saari doono guryo badan iyo shaqooyin, iyo sidoo kale meelaha diirada lagu saari karo maalgelinta dadweynaha, mashaariicda, adeegyada, iyo barnaamijyada. Degmada oo dhan, waxaa ka jira xarumo *goboleed* iyo kuwo *maxalli ah*, laga bilaabo 2021, waxaa jiri doona xarumo maxalli ah oo laga aqoonsan yahay *gobolka oo dhan*.

Qorshaha Guud waxa ku jira dhawr nooc oo xarumaha *deegaanka ah* – xarun hawleed aan la wadaagin, xarunta ganacsiga gobolka, xarunta ganacsiga bulshada, xarunta xaafadda, iyo xarunta xaafadaha miyiga. Xarumaha gobolka loo aqoonsaday inta badan waxay ku yaalaan nooca aagagga iyo dhismooyinka ka jira aagga, waxayna abuuraan meelo mustaqbalka loo isticmaali karo kobaca magaalada.

Xarumaha *maxalliga ah* ee lagu tilmaamay Qorshaha Guud waxaa ka mid ah:

- Xarumaha warshadaha iyo ganacsiga ee cufnaanta sare leh, iyo aagagga guryaha cufnaanta sare leh, ayaa lagu sifeeyay inay yihiin **xarumo waxqabad oo aan la wadaagin** waxaana loogu talagalay inay noqdaan goobaha aasaasiga ah ee gobolka ee lagu samayn lahaa horumarinta ganacsiyada noocan ah.
- Goobaha cufnaanta dhexdhexaadka ah leh iyo inta badan xarumaha tafaariiqlayda waxaa loo yaqaanaa **xarumaha ganacsiga bulshada**.
- Xarumaha yaryar oo maxalliga ah oo inta badan lagu iibiyo alaabada iyo adeegyada ay u baahan yihiin dadka deegaanka ayaa loo yaaqaanaa **xarumaha ganacsiga xaafadaha**.

Sababo la xiriira cufnaanta jirta, dhismooyinka isticmaalkooda isku dhafan, iyo aagagga, **White Center** ee bartamaha magaalada North Highline ayaa hadda ah Xarunta Waxqabadka ee Aan La Wadaagin ee *maxaliga ah* (UAC). **Degmada Ganacsiga ee Skyway** iyo nawaaxigeeda ayaa la soo jeediyay inay noqdaan UAC si diirada loogu saaro hawlaha dhismooyinka guryaha iyo ganacsi ee bulshada ku dhaqan aaggan. Labadaba waxaa sidoo kale loo tixgalinayaa in loogu magacdaro *Xarumaha Degmada* si loogu ogolaado inay u tartamaan maalgelinta gaadiidka gobolka oo dhan ah.

Ereyada la xiriira Isticmaalka Dhulka iyo Xuduudeynta
Khariidadda Isticmaalka Dhulka ee Qorshaha Guud waxa ay faraysaa in qoondeynta rasmiga ah ee isticmaalka dhulka lagu dabaqo dhammaan guryaha aan la wadaagin ee Degmada King. Tilmaamaha isticmaalka dhulka ayaa qeexaya goobta guud iyo xadka isticmaalka dhulka ee la ogol yahay. Tilmaamahaan waxaa ka mid ah: xarun waxqabadka ee aan la wadaagin, dhismooyinka qorshaysan ee magaalada, xarunta ganacsiga bulshada, ganacsiyada bannaanka xarumaha ah, xarunta ganacsiga xaafadda, meelaha aadka looga degan yahay magaalada, meelaha sida dhexdhexaadka ah looga degan yahay magaalada, meelaha aan aadka looga deganayn magaalada, dhulka miyiga, magaalooyinka miyiga, xarumaha ganacsiga ee xaafadaha miyiga, beeraha, kaynta, qoditaanka macdanta, nidaamka meelaha bannaan ee degmada King County, kala saaraha aagga keymha/magaalooyinka, jardiinooyinka/keymaha kale, iyo goobaha warshadaha.
Halbeegga Dhismo ee Gaarka u ah Dhismooyinka waxaa loola jeedaa waa shuruudo ka baxsan shuruudaha ugu yar ee xeerka xuduudeynta kuwaas oo khuseeya hal ama in ka badan oo guryo ah. Xeerarkan waxay xaddidayaan isticmaalka guriga ama waxay abuurayaan heerar dheeraad ah si loo ansixiyo oggolaanshaha.
Xeerarka Degmadda ee Gaarka ah waxay oggolaadaan isticmaalka kala duwan ee dhulka waxayna heerarka dhismooyinka uga baahdaan shuruudaha ugu yar ee xeerka xuduudeynta waxaana inta badan lagu dabaqaa tiro badan oo dhismooyin ah. Waxayna balaariyaan ama wax ka beddelaan isticmaalka caadiga ah iyo/ama heerka oggolaanshaha ee xeerka xuduudeynta. Xeerarkaan waxaa badanaa lagu sameeyaa oo lagu soo jeediyaa iyada oo loo marayo geedi-socodyada qorshaynta ee waaweyn, sida qorshayaasha xaafad hoosaadka.
Xuduudeynta sida ku jirta Xeerka Degmada King County, Ciwaanka/Title 21A, ayaa qeexaya baaxadda isticmaalka dhulka iyo hawlaha dhammaan guryaha aan la wadaagin ee Degmada King County. Kala soocida aaggaga waxay fulisaa khariidadaha Isticmaalka Dhulka, waxaana ka mid ah: beeraha, kaynta, dhulka macdanta, dhulka miyiga, kaydka magaalooyinka, deegaanka magaalada, ganacsiga xaafadaha, ganacsiga bulshada, ganacsiga gobolka, xafiisyada, iyo warshadaha. Qaar badan oo ka mid ah aagaggani waxay leeyihiin qayb-hoosaadyo tilmaamaya cufnaanta guryaha ee loo oggol yahay aaggaas. Tusaale ahaan, aagga la deggan yahay ee magaaladu waxay leedahay siddeed qayb-hoosaadyo oo u dhexeeya R-1 (1 guri oo la oggol yahay halkii ekarba) ilaa R-48 (48 guri ayaa loo oggol yahay halkii ekar).

Xigashooyinka:

- Websaydhka Waaxda Adeegyada Maxaliga ah ee Degmada King County, la galay 11/6/2021
- Qorshaha Guud ee Degmada King County, Qaamuuska, 7/2020 la dhaqan geliyey
- Xeerka Degmada King County 2.10.020, Qeexitaannada Waxqabadka, Maaraynta iyo La Xisaabtanka, la galay 11/6/2021
- Xeerka Degmada King County Cinwaanka/Title 21A, waxa la galay 11/6/2021
- Warbixinta Xeeladaha Ka-hortagga Barakaca Skyway-West Hill iyo North Highline ee Degmada King County, la gudbiyay 9/2021
- HADAFKA Golaha Gobolka ee Puget Sound 2050, Qaamuuska, 10/2020 la dhaqan geliyey
- Hindisaha Horumarinta Sinnaanta ee Magaalada Seattle, la galay 11/6/201
- Merriam Webster Online, la galay 11/6/2021